

Ku waalidka/mas'uuliyiinta ardayda iskoolka billaabaya iyo ardayda fasallada 1-3. aad ee iskoolka Lakkegata sanad dugsiyedka 2019/2020

Oslo, 08.04.2020

WARBIXINTA DEEQ BOOS BAR AH OO BILAASH AH EE ISKOOLKA FIRFIRCOONIDA [AKTIVITETSSKOLEN - AKS] EE FASALLADA 1-4. AAD SANAD DUGSIYEDKA 2020/2021

Dhammaan carruurta billaabaya fasallada 1-aad iyo 4-aad ee iskoolka Lakkegata, waxaa loogu deeqayaa boos bar ah oo bilaash ee laga siinayo Iskoolka firfircoonda (AKS) sanad dugsiyedka 2020/2021. Deeqdu waxay dhaqan gelaysaa laga billaabo agoosto 2020-ka.

Nidaamka booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS

- 12 saac ayaa maalin walba si isle'eg loo qaybin doonaa iskoolka kaddib, taas oo keenaysa in la helo wakhti fiican oo wax lagu qorsheeyo oo sare loogu qaado tayada deeqda
- toddobaadkiiba 2 maalmood marka uu iskoolku xiran yahay (fasaxa dayrta- iyo midka qaboobaha, fasaxa ciidaha masiixiga ee jul- iyo påske iyo mid kasta oo ka mid ah toddobaadyada fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo, oo uu AKS xiran yahay).
- Maalmaha qorshaynta/maalmaha u dhixeyya laba maalmood oo fasax ah ee sanad dugsiyedka wuxuu ardaygu joogi karaa maalin ½ ah (AKS ilaa iyo laba maalmood ayuu sanadkii u xirnaan karaa maalmaha qorshaynta iskoolka dartood)

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuu ka qaybqaato dhammaan deeqaha firfircoonda ee waxbarashada taageeraya, waxaad codsan kartaan boos buuxa oo qiimaha la dhimay.

Boos buuxa oo qiimaha la dhimay

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka/mas'uuliyiinta ilmaha, wuxuuna noqon doonaa inta u dhixaysa 242 ilaa 1029 karoon bishiiba. Haddii uu ilmuu boos buuxa haysto wuxuu AKS joogi karaa wakhtiga iskoolka ka hor iyo ka dib ba, iyo maalin walba marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

Ka-qaybqaadashada oo korodha iyo aqoonta luuqadda oo sare loo qaado

AKS waa goob wax lagu barto halkaas oo ciyaar iyo waxbarasho sare loogu qaadayo horummarka maaddo iyo midka bulsho ee ilmaha. AKS wuxuu bixinayaa deeq is-raacsan taas oo iskoolka lala kaashanayo.

Manhaj iyo xeerka AKS, iyo hagaha Wadashaqaynta guriga-iskoolka ayay deeqdu ku salaysan tahay.

Hadafka laga leeyahay booska barka ah ee AKS waa:

- in la kordhiyo ka-qaybqaadashada AKS
- in sare loo qaado aqoonta luuqadda ee ardayga
- in sare loo qaado tayada AKS oo la hubiyo deeq isku mid ah

Sidaan ayaad boos uga codsanaysaa AKS

Marka ay waalidku/mas'uuliyiinta ilmuhi AKS ilmo ku qorayaan waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo [www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen.](http://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen)

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya boos AKS oo bar ah oo bilaash ah ka eeg <https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltidspllass/>.

Iskoolka la xiriir haddii aad wax su'aal ah qabto.

Mahadsanidiin

Iskoollada Oslo